

# FOUNDATION FOR BLACK COMMUNITIES



## BARNAAMIJKA DADWEYNAHA DEEQA CATAPULTA

**BLACK IDEAS GRANT 2.0**

---

**2024 | SU'AALAHHA CODSIGA**

Funded in part by the  
Government of Canada's Black-Led  
Philanthropic Endowment Fund

**Canada** 



# Tusmada

- B** Xaqiijinta u-qalmitaanka
- T** Macluumaadka Codsadaha
- J** Guud-marka Mashruuca iyo Sharaxaada
- X** Saamaynta Bulshada iyo Taageerada
- KH** Joogteynta iyo Maareynta Khatarta
- D** Qorshaha Mashruuca iyo Miisaaniyadda
- R** Dukumentiyada Taageerada



## SHARAXAADA

Si loo taageero qaabaynta iyo/ama bixinta mashaariicda<sup>1</sup>, barnaamijyada, iyo/ama adeegyada sida tooska ah ay uga faa'iidaystaan bulshooyinka Madow ee Kanada.

## UJEEDOYINKA

Barnaamijka Deeqda Catapult Stream Grant Program waxa uu hiigsanayaa in uu gaadho ujeedooyinka soo socda:

- Taageerida hindisayaasha jira ama kuwa cusub ee wax ka qabanaya baahiyaha gaarka ah ee ka dhex jira bulshooyinka Madow
- Horumarinta nashqadda barnaamijka iyo bixinta adeegga
- Kordhinta helitaanka iyo galaangalka adeegyada bulshada ee khuseeya kuwaas oo horumarinaya:
  - » Xaaladaha dhaqan-dhaqaale
  - » Farshaxanka iyo ka qaybgalka dhaqanka
  - » Caafimaadka iyo fayoaqabka
  - » Ka-qaybgalka bulshada
  - » Dadaalka wax lagaga qabanayo cunsuriyadda ka dhanka ah dadka madow

## CODSADAYAASHA U-QALMA

- Noqo hay'ad samafal oo diiwaan gashan oo mawqif wanaagsan ka taagan Hay'adda Dakhliga Kanada (CRA), AMA Noqo urur aan faa'iido doon ahayn oo lahaanshiyihiisa lagu buriyay sharciga federaalka ama gobolka AMA mid ay Leeyihiin koox ama iskaashato.
- Inuu noqdo mid Madow-Hogaamiyo, U-xilsaaran-Madow, ama U-adeega-Madow marka la eego dhammaan heerarka ururka, oo ay ku jiraan maamulka iyo hawlgalladaba
  - » Ugu yaraan saddex-meelood laba (2/3) hoggaanka ururka, shaqaalaha iyo guddigu waa in ay isu aqoonsanyihiin inay yihiin Madow
- Hindisaha la soo jeediyay waa in fadhigiisu yahay gudaha Kanada oo uu u adeegaa bulshooyinka madow ee Kanada
- Soo bandhig isku xidhnaansho cad iyo fahamkaaga bulshooyinka Madow ee ay u adeegaan

<sup>1</sup> "Mashruuc" waxa loola jeedaa hindise aan si toos ah u bixin adeeg bulsho balse ku lug leh hawlo ay ka mid yihiin isugu yeedhida koox dad ah si loo horumariyo istaraatiijiyad ama qorshe hawleed. Mashruucyada badanaa waxay diiradda saaraan qorsheynta, abaabulka, ama u diyaargarowga dadaallo ama hindisayaal ballaaran



- Keen caddayn ku saabsan taageerada bulshada ee loogu talagalay hindisaha la soo jeediyay

## **NOOCYADA KHARASHAADYADA LA OGGOLYAHAY**

Kharashaadyada soo socdaa waxay xaq u leeyihiin maalgelinta hoos timaada barnaamijka deeqdan:

- Mushaharka shaqaalaha iyo faa'iidooyinka sida tooska ah ula xiriira hindisaha
- Qalabka iyo agabka barnaamijka
- Qalabka lagama maarmaanka u ah bixinta barnaamijka
- Kirada iyo adeegyada loogu talagalay goobta barnaamijka
- Suuqgeynta iyo kharashaadka wacyigelinta
- Horumarinta xirfadeed ee la xidhiidha hindisaha
- Qiimaynta iyo ka warbixinta kharashaadyada
- Kharashaadyada safarka ee sida tooska ah ula xiriira hirgelinta barnaamijka
- Kharashaadyada maamulka

## **NOOCYADA KHARASHAADYADA AAN LA OGGOLAYN**

Kharashaadyada soo socdaa uma qalmaan maalgelinta hoos timaada barnaamijka deeqdan:

- Kharashaadyada raasumaalka ah (tusaale, iibsashada dhisme, dayactirada waaweyn)
- Deynta hawlgabka ama maalgelinta khasaaraha
- Kharashaadyada la galay ka hor ansixinta ogolaanshaha deeqda
- Dhaqdhaqaaqyada siyaasadeed ama diimeed
- Hindisayaal aan si toos ah faa'iido ugu lahayn bulshooyinka Madow.
- Kharashaadyo ay daboolayeen ilo kale oo maalgelineed



## QAYBTA B: XAQIJJINTA U-QALMITAANKA

### Ururkaaga ama kooxdaadu ma tahay (n):

*Fadlan dooro doorashada saxda ah ee hoose; Codsadayaasha waxaa la weydiin doonaa CRA#-kooda, Nambarka burinta lahaanshiyaha ama heerka Donee ee u-qalma foomka codsiga. Fadlan tixraac [hagaha](#) haddii aadan hubin xaaladaada sharci.*

- o Urur samafal diiwaangashan
- o Urur aan la lahayn faa'iido doona aan ahayn
- o Urur la leeyahay faa'iido doona aan ahayn, iskaashato ama koox (aan u-qalmin)
- o Midna

### Haddii aad tahay hay'ad aan la lahayn oo samafal oo aan faa'iido doon ahayn ama diiwaan gashan, waa maxay CRA-gaaga Ganacsigu/Lambarka Samafalka?

**Lifaaq:** *Fadlan soo lifaaq shahaadadaada Shirkadeed/Diiwaangelinta; kooxaha la leeyahay, waa inaad soo lifaaqdaan dukumeentiga ururka aad shuraakada la tihiin.*

### Haddii aad tahay urur la leeyahay oo aan faa'iido doon ahayn ama koox, ma leedahay urur shuraako aad la tahay oo aan haysan lahaanshiyo?

- o Haa
- o Maya (waa in aad heshaa shariik aan la lahayn ka hor inta aanad codsan)

### Haddii aad leedahay shariik aan lahaanshiyo lahayn ama shariik urur samafal ah, soo gudbi Nambarkooda Ganacsiga ee CRA-ga/Nambarka Samafalka

**Lifaaq:** *Fadlan soo lifaaq shahaadadaada Shirkadeed/Diiwaangelinta; kooxaha la leeyahay, waa inaad soo lifaaqdaan dukumeentiga ururka aad shuraakada la tahay.*

### Ururkaagu ma yahay mid uu hogaamiyo-Madow, u-xilsaaran-Madow, ama u adeega-Madow heer kasta uu yahayna maku jiraan maamulka iyo hawlgalladaba?

- o Haa
- o Maya



**Ururkaagu ma yahay mid uu hogaamiyo-Madow, u-xilsaaran-Madow, ama u adeega-Madow heer kasta uu yahayna maku jiraan maamulka iyo hawlgalladaba? Ugu yaraan saddex-meelood laba (2/3) hoggaanka ururkaaga, shaqaalaha iyo guddigu ma isu aqoonsan yihiin inay yihiin Madow? Fadlan isha mari qeexitaanka hoos ku xusan ka hor inta aanad ka jawaabin su'aasha.**

**Urur Madow-Hogaamiyo:** *Ururadan ugu horreyn waxa hogaamiya oo maamula shakhsiyaad Madow ah. Ugu yaraan 2/3 hoggaankooda, oo ay ka mid yihiin kooxdooda fulinta iyo guddiga agaasinka, oo ah Madow. Hoggaamintooda halkani waxa ay muujinaysa in go'aamada, siyaasadaha, iyo jihataynta istaraatiijiyadeed ay ka tarjumayaan waayo aragnimadooda nololeed iyo mudnaanta dadka Madow.*

**Urur U-xilsaaran-Madow:** *Ururadani waxay si joogto ah ugu adeegaan bulshooyinka Madowga ah, iyadoo wax ka qabanaya xaaladaha iyo bixinta adeegyada la xidhiidha dadka Madowga ah. Barnaamijyadooda iyo hindisayaashooda waxaa loogu talagalay in ay wax ka qabtaan caqabadaha sida aan habboonayn u saameeya bulshooyinka Madow.*

**Urur U-adeegga-Madowga:** *Ururadan Adeegyadooda, taageeradooda iyo agabkoodaba waxa loo qaabeeyey oo loogu talagalay inay taageeraan bulshooyinka Madowga ah, iyadoo hubinaya in adeegyadooda iyo barnaamijyadoodu ay daboolayaan baahiyaha shakhsiyaadka Madowga ah, xitaa haddii ka-faa'iidaystayaasha adeeggooda ay ka mid yihiin kooxo kale.*

- Haa
- Maya

**Hindisaha aad soo jeedisay fadhigiisu ma yahay gudaha Kanada?**

- Haa
- Maya

**Hindisaha aad soo jeedisay si toos ah ma ugu adeegi doonaa bulshooyinka Madow ee Kanada?**

- Haa
- Maya

**Ururkaagu ma ka helay maalgelin Black Ideas Grant (B.I.G.): Bridge and Build 2023?**

- Haa
- Maya



# QAYBTA T: MACLUUMAADKA CODSADAHA

## Magaca Ururka:

- o Fadlan sheeg magaca ururkaaga.

## Cinwaanka Ururka:

- o Cinwaanka wadada (lambarka wadada iyo magaca):
  - o Caasimadda/magaalada
  - o Gobol ama deegaan
  - o Koodhka boostada
  - o Mareeg (ikhtiyaari)
  - o Cinwaanada warbaahinta bulshada (ikhtiyaari)
  - o Goobta Juqraafiyeed: Miyi, Meelaha-Fog, Waqooyi, Magaalo]

## Qofka Ururka Lagala Xiriirayo #1:

- o Magaca oo buuxa
- o Ciwaanka iimaylka
- o Lambarka Taleefanka
- o Jagada

## Qofka Ururka Lagala Xiriirayo #2:

- o Magaca oo buuxa
- o Ciwaanka iimaylka
- o Lambarka Taleefanka
- o Jagada

## Xubnaha Guddiga iyo Maamulka Sare:

*Liis garee jagooyinka iyo magacyada buuxa ee xubnaha guddigaaga iyo kooxda maamulka sare.*

## Luqadee ayuu ururkaagu doorbidayaa inuu ku helo fariimaha?

- o Ingiriis
- o Faransiis



**Macluumaadka qofka lagala xidhiidhi karo ururka shuraakada aad la tihin ee aan la lahayn.**

- o Magaca oo buuxa
- o Ciwaanka iimaylka
- o Lambarka Taleefanka
- o Ciwaanka

**Faahfaahinada ururka shuraakada aad la tihin ee aan la lahayn.**

- o Magaca ururka shuraakada aad la tihin ee aan la lahayn
- o Lambarka Ganacsiga Shariika aan lahaanshiyaha lahayn/Samafalka ee CRA-ga
- o Cinwaanka wadada (lambarka wadada iyo magaca):
- o Caasimadda/magaalada:
- o Gobol ama Deegaanka [Ka dooro]
- o Koodhka boostada
- o Mareegta
- o Cinwaanada warbaahinta bulshada (ikhtiyaari)
- o Goobta Juqraafiyeed: Miyi, Meelaha-Fog, Waqooyi, Magaalo

**Tirada sannadada la shaqaynayey (Ururka codsadaha)**

- o 0-1 sano
- o 1-5 sano
- o 5-10 sano
- o 10+ sano

**Ururkaagu diiradda ma saaraa ama wax ma ka qabtaa kuwan soo socda (Calaamadee dhammaan kuwa khuseeya):**

- o Guryo qiimahooda kirada la awoodi karo
- o Kobcinta Dhaqaalaha Bulshada/Yaraynta Saboolnimada
- o (shabakadaha, isbahaysiyada, wareejinta dhismaha, siyaasadda, hoggaanka, xarumaha/goobaha)
- o Helitaanka cuntada



- Fanka/Dhaqanka/Warbaahinta
- Caafimaadka iyo Fayoqabka
- Cunsuriyada ka dhanka ah Madowga / Cadaaladda
- Waxbarashada
- Adeegyada aadanaha
- Ciyaaraha iyo Madadaalada



# QAYBTA J: GUUD-MARKA MASHRUUCA IYO SHA-RAXAADA

**Fadlan sharaxaad kooban ka bixi hindisahaaga (300 erey)**

**Waa kuwee kooxaha koowaad ee ka tirsan bulshada Madow ee ka faa'iidaysan doona hindisahan? (Dooro dhammaan kuwa khuseeya)**

Dhammaan bulshada Madowga ah  
Afrikaan Kanadiyaan/Afrikaan  
Afro-Karibiyaan Kanadiyaan/Afro-Karibiyaan  
Bulshada Afro- Asaliga ah  
Bulshooyinka Afro-Latino/a/x

**Waa kuwee dadka labaad ee uu u adeego ururkaagu? Sax Sanduuqa**

2SLGBTQI+  
Carruurta (0-14)  
Soogalootiga jiilka kowaad, qaxootiga ama soogalootiga cusub  
Wadamadii ugu horeeyay, Métis iyo Inuit dadkooda  
Darbijiifta/ Guri aan deganayn  
Bulshooyinka Waqooyi  
Bulshooyinka laga tirada badan yahay ee luqadda rasmiga ah  
Dadka naafada ah  
Reer Miyiga iyo Meelaha Fog  
Waayeelka (65+)  
Haweenka iyo/ama gabdhaha  
Dhalinyarada (15-24)  
Kuwo kale: [waxa uu wataa sanduuqa qoraalka oo khasab ah]

**Hindisahaagu ma waxa weeye mid:**

- Cusub
- Hore u jirey



- » **Haddii Hindisahaagu Yahay Cusub:** Sidee ku ogaatay in mashruucan loo baahan yahay? Fadlan keen caddayn muujinaysa sida qiimayno la xidhiidha baahiyaha bulshada, cilmi-baadhisyo, tirokoobo, ama marag-kacayaal ka tirsan bulshada. (Xadka Erayada: 300 oo erey)
- » **Hadii Hindisahaagu Hore u Jirey:** Maxay ahaayeen guulaha barnaamijka ee aad ilaa hadda aad gaadheen, maxayse tahay waxa keenaya in uu sii socdo? Ku dar jawaabta xog kasta oo saamayn leh, jawaab-celin ama qiimayno (Xadka Erayada: 300 oo erey)

**Waa halkee heerka uu hadda marayo hindisaha la soo jeediyay? Marxaladee ayuu mashruucaagu ku jiraa hadda? (Dooro dhammaan kuwa khuseeya)**

- o Qorshayn
- o Hirgelin
- o Qiimayn
- o Balaadhin

**Aag(gee) Mashruucani diirada saaraya oo wax ka qabanayaa? (Dooro mid ama ka badan)**

- o La-dagaalanka midab-takoorka Madowga
- o Horumarinta Natiijooyinka Bulshada ee Bulshooyinka Madow
- o Horumarinta Natiijooyinka Dhaqaale ee Bulshooyinka Madow

**Waa kuwee Yoolalka Horumarinta Waara ee ku tacaluqa mashruucaaga? (Dooro mid ama ka badan)**

- o Hadafka 1: Faqri la'aanta
- o Hadafka 2: Dabargoynta gaajada
- o Hadafka 3: Caafimaadka iyo fayoaqabka
- o Hadafka 4: Waxbarasho tayo leh
- o Hadafka 5: Sinnaanta jinsiga
- o Hadafka 6: Biyo nadiif ah iyo fayadhowrka
- o Hadafka 7: Tamar la awoodi karo qiimaheeda oo nadiif ah
- o Hadafka 8: Shaqo hufan iyo kobac dhaqaale
- o Hadafka 9: Warshadaha, hal-abuurka, iyo kaabayaasha



- Hadafka 10: Sinnaan la'aanta la dhimay
- Hadafka 11: Magaalooyin iyo bulshooyin waara
- Hadafka 12: Masuuliyada Isticmaalka iyo wax soo saarka
- Hadafka 13: Taalaba qaadka cimilada
- Hadafka 14: Noolayaasha biyaha ka hooseeysa
- Hadafka 15: Noolayaasha dhulka
- Hadafka 16: Nabada, cadaalada, iyo hay'ado awood badan
- Hadafka 17: Iskaashiga yoolalka

**Waa kuwee Go'aamiyayaasha Bulshada ee Caafimaadka ee aadka ugu dhow mashruucaaga? (Dooro hal ama ka badan)**

- Dakhliga iyo ilaalinta bulshada
- Shaqaalaysiinta iyo xaaladaha shaqada
- Waxbarashada iyo akhriska
- Deegaanka (guryaha, adeegyada aasaasiga ah, goobaha bulshada)
- Helitaanka adeegyo caafimaad oo jaban
- Waaya aragnimada caruurnimada
- Helitaanka cuntada
- Jinsiga
- Dhaqanka
- Qoomiyada iyo isir nacaybka
- Ka mid noqoshada bulshada iyo taageerooyinka

**Waa maxay wadarta guud ee miisaaniyada mashruucaagu, sidoo kale intee in le'eg oo maalgalin ah ayaad ka codsanaysaa Catapult Stream Grant? ( Qadarka deeqda ugu badan: \$80,000)**

**Fadlan sharax sababta hindisahaaga aad soo jeedisay loogu baahan yahay iyo sida ay uga faa'iidsan doonaan bulshooyinka Madowga ah . (250 eray)**

**Sidee hindisahaaga la soo jeediyay u fulinayaa ujeedooyinka Catapult Stream Grant?**



*Si faahfaahsan u qeex sida hindisahani uu u taageeri doono dadaallada jira ama kuwa cusub ee wax loogaga qabanayo baahiyaha bulshooyinka Madowga ah. Sharax sida ay u wanaajin doonto naqshadeynta barnaamijka iyo bixinta adeegga, iyo sida ay u kordhin doonto helitaanka iyo galaangalka adeegyada bulshada ee wanaajiya xaaladaha dhaqan-dhaqaale, fanka iyo dhaqanka, caafimaadka iyo fayoqabka, ka-qaybgalka bulshada, iyo/ama la dagaallanka midab-takoorka ka dhanka ah Madowga. ( 300 oo erey ugu badnaan)*

**Waa maxay waxqabadyada gaarka ah ee hindisahaaga la soo jeediyay Catapult Stream Grant ay taageeri doonto? Bixi macluumaad faahfaahsan . (300 oo erey ugu badnaan)**

**Sidee bey bulshooyinka Madawga ahi uga qaybqaadan doonaan horumarinta, hirgalinta, iyo maamulida hindisahan? (250 erey ugu badnaan)**

**Ma jiri doonaa kharash laga qaado bulshooyinka Madow si ay u helaan barnaamijka ama adeegyada? Hadday haa tahay, sabab, sideese ku xaqiijinaysaa helitaan caddaalad ah? (ugu badnaan 150 erey)**



# **QAYBTA X: SAAMAYNTA IYO TAAGEERADA BULSHADA**

**Keen caddayn muujinaysa taageerada bulshada ee hindisahaaga aad soo jeedisay. (Tani waxaa ku jiri kara waraaqo taageero, natiijooyin xog-ururineed, ama marag-kac.)**

**Qiyaastii imisa qof ayay saameyn ku yeelan doontaa maalgelintani sanadkiiba?**

- o Toos
- o Dadban

**Hindisahaagu ma wuxuu ugu horrayn diiradda saarayaa : Ka dooro**

- o Qaran/gobollo badan
- o Aagga Weyn ee Toronto
- o Waqooyiga Ontario
- o Bariga Ontaariyo
- o Galbeedka Ontaariyo
- o Bartamaha Ontaariyo
- o Koonfurta Quebec
- o Galbeedka Quebec
- o Bariga Quebec
- o Waqooyiga Quebec
- o Waqooyiga Kanada
- o Newfoundland iyo Labrador
- o Jasiirada Prince Edward Island
- o Saskatoon
- o Regina
- o Koonfurta Saskatchewan
- o Waqooyiga Saskatchewan
- o Winnipeg
- o Koonfurta Manitoba



- Waqooyiga Manitoba
- Jasiiradda/Xeebta Vancouver
- Dhulweynaha Hoose ee Mainland British Columbia
- Thompson-Cariboo
- Waqooyiga British Columbia
- Calgary
- Edmonton
- Waqooyiga Alberta
- Koonfurta Alberta
- Nova Scotia
- New Brunswick

## **Su'aalaha M30: (loo codsaday Quebec kaliya)**

- Ururkaaga fadhigiisu ma tahay Quebec oo ma u adeegaa bulshooyinka Madow?
- Haa
- Maya

## **Haddii ay haa tahay su'aasha sare, ururkaagu ma ka helaa 50% ama ka badan maalgelin dawladda ama deegaanka?**

- Haa
- Maya



## **QAYBTA KH: JIRITAANKA IYO MAAREYNTA HALISTA**

**Waa maxay khataraha ama caqabadaha muhiimka ah ee aad saadaalinayso in lagala kulmo hirgelinta hindisahan, sideese wax uga qaban doontaa? (ugu badnaan 200 oo erey)**

**Maxaa qorshe ah oo aad haysaa si aad u hubiso jiritaanka hindisahan ka dib marka ay dhammaato wakhtiga maalgelintu? (250 erey ugu badnaan)**

**Sideed u cabbiri doontaa guusha iyo saamaynta hindisahaaga? Sharax qorshahaaga qiimayneed . (250 erey ugu badnaan)**



# QAYBTA D: QORSHAHA MASHRUUCA IYO MIISAANIYADDA

## Fadlan faahfaahi miisaaniyadaada

*Tilmaamaha: Ku dar sharraxaad gaaban iyo qiimaha shay kasta.*

Qaybaha Kharashaadka	Faahfaahinad Kharashka	Miisaaniyadda
Mushaharka Shaqaalaha iyo Dheefaha	Daboolista mushaharka, gunnooyinka iyo dheefaha shaqaalaha ka shaqaynaya barnaamijka/mashruuca/ adeegga maalgelinta loo codsaday (mushaharka, cashuuraha mushaharka, dheefaha, kharashyada shaqaalaysiinta, iwm.)	
Qalabka iyo Alaabta Barnaamijka	Daboolista agabka la isticmaali doono inta mashruuca lagu guddo jiro, iyo sidoo kale kuwa lagama maarmaanka u ah fulinta barnaamijyada/mashaariicda/adeegyada.	
Kirada iyo Adeegyada	Kirada/kharashka kiraynta xarumaha barnaamijka iyo adeegyada looga baahan yahay inay ka shaqeeyaan goobaha/xarumaha barnaamijka.	
Tababarka iyo Shirarka	Aqoon-is-weydaarsiyo, siminaaro, shirar, fududeeyayaal, khubaro iyo dhacdooyin kale oo barnaamijka la xiriira.	
Socdaalka & Gaadiidka	Daboolida kharashaadka safarka ee ku baxa hawlaha mashruuca la xiriira sida shirarka, booqashooyinka goobta, ama shirarka daneeyayaasha.	
Abaalmarinada	Astaanta qaddarinta ee la siiyo khubarada, marti-qaadayaasha, odayaasha ama xubnaha bulshada ee ugu tabaruca si iskaa wax u qabso ah khibradooda si ikhtiyaari ah.	
Isgaarsiinta & Wacyigelinta	Kor u qaadida wacyiga, oo ay ku jiraan xayaysiimaha wacyigelinta iyo agabka xayaysiinta.	
Kuwo kale	Faahfaahinta kharashyada dheeraadka ah ee barnaamijka la xiriira	
Kuwo kale	Faahfaahin kharashaadka dheeraadka ah ee barnaamijka la xiriira	
<b>Wadarta</b>		

## **QAYBTA R: DUKUMENTIYADA TAAGEERADA**

**Soo lifaaq dukumentiyada taageerada, ee ay ka midka yihiin:**

- o Warqadaha taageerada
- o Qorshaha Mashruuca oo faahfaahsan
- o Miisaaniyad faahfaahsan
- o Wixii dukumeenti dheeraad ah ee khuseeya

